**Xeerka lamb. 155**

**Qodobbo lagu nidaaminayo ku dhaqanka qodobbada Amarka Lam. 43 ee 18 Luulyo 1950 ee khuseeya caymiska jirrada ee shaqaalaha ku xiran waajibaadka caymiska sida ku xusan xeerarka dhaqangalka ah.**

## MAAMULKA WASAAYADA TALYAANIGA EE SOMALIYA

## MAAMULAHA GUUD

Kadib markii la arkay Sharciga lamb. 1301 ee 4 Nofember 1951 oo ansixiyey Heshiiska Maamulka Dalka Somaliaya lagu hoos geeyey Maamulka Talyaaniga oo awood u yeeshay in fulinteeda lahaado.

Kadib markii la arkay amar-sharciga lamb 43 ee 18 Luulyo 1950.

Kadib markii la garwaaqsaday baahida loo qado in la dhiso nidaam haggi dono fulinta amar sharciga sare ku xusan oo la xiriira badbaada shaqaalaha ee cudurada sida uu qorayaan shurucdaas.

## WUXUU XEEREYNAYAA

## CINWAANKA 1AAD

Dadka Baadbadinta la Geliyey

### Qod. 1

Amaradda sharcigaan uu xambarsan yahay waxaa lagu dabaqi doona shaqaalaha lab iyo dheddig ee ka shaqeeya Hey'adaha, Mashaaricda, ganacsida, farshaxaanka, beeraha, gaadidka kuwaaso lagama marmaan ah in la geliyo badbaadada cudurada.

### Qod. 2

Mas'uuliyadda in la geliyo badbadada shaqaalaha ee Hey'adda Badbaadada Bulshada Somaliyeed – Qeybta Cuduradda – waxaa la dulsaaray Hey'adaha, Shirkadaha iyo loo-shaqeeyayaalka ay u shaqeeyaan shaqalaha lagu tilmaamay qodobka sare ku xusan, kadib markii laga reebo shaqaalaha lagu tilmaamay sharciga badbaadinta lamb 22 ee 19 Janaayo 1942, iyo kuwa shaqaalaha dowladda ee hoos yimaada Hey'ada Qaranka ee Ka-Hortegga iyo Badbaadinta ee sharciga lamb. 1436 ee 28 Luulyo 1939 ee lagu dhisay Hey'adda Qaranka ee Caymiska ee shaqaalaha hey'adaha dowliga ah.

### Qod. 3

Ka qeyb ahaanshada badbaadada shaqaalaha wuxuu bilaabanayaa waqti shaqaalahas loo qoray shaqada, wuxuuna ku eg yahay maalinta la ruqseyey ama uu istiqaar oo uu geystay.

### Qod. 4

Shaqaalaha la ruqseyey ama istiqaaro geyey ama shaqada laga hakiyey shaqada wuxuu xaq u yeelan doono in loo fidiyo howlaha badbaadinta muddada iyo xendaabka ku tilmaaman qodobada hoos ku qoran.

### Qod. 5

Cudur waxaa lagu fasiray wax allaliyo wixii is bedel jirka iyo dhimirka qofka u geesta kaas oo lagama marmaan ka dhibo baahida dhaqtar iyo daaweyn.

**Qod. 6**

Badbaadinta shaqaalaha ma ku reebayo shaqaalaha da' kadib markii laga reebo dhowrista loo-shaqeeyaha ee shurucda la xiriira daryeelka caruurta iyo dumarka.

**Qod. 7**

Shaqaluhu wuxuu xaq u leeyahay xuquuqda badbaadinta ee sharcigu carifay sidoo kalena xubnaha qoyskiisa.

Waxaa loola jeeda xubnaha qoyska ee shaqaalaha:

a) Xaaska, oo si sharci ah aysan ku kala tegin xukun horay u dhacay;
b) Sayga, oo da'diisu 60 sano jir ama ka yar, oo noqon kara mid curyaan, oo aan si sharci ah aysan ugu kala tegi xukun horay u dhacy;
c) Caruurta xalaasha ah ama la korsaday oo ilaa 18 jir ah ama aan da' loo xisaabin haddii ay curyaan yihiin;
d) Gabdhaha oo aan weli gursanin oo da' loo xisaabin lakiin weli la nool waalidkood;
e) Waalidka oo shaqaalaha la nool oo aanan ka weyneeyn 60 jir aabaha iyo 55 hooyada, ama curyaan shaqo noqday;
f) Waalidka soo korsaday shaqaalaha, kaas oo lagu dabaqi doono faqradda (e) ee sare ku xusan;
g) Walaalaha la dhashay shaqaalaha, kuwaas oo lagu dabaqi doono xeendaabka (c) iyo (d);
h) Caruurta la helay oo si toos ah loo korsaday soona gelaaya xeendaabka caruurta la dhalay (c) iyo (d).

**Qod. 8**

Xubinimadda qoyska waxaa muhim is ay jirto isla noolasha.

Si loo xajiiyo arrintaasi waxaa la baaraya in qo shaqaalaha ahi uu noolol maalmeeda xubnaha qoyskiisa uu haayo oo aysan jirin shaqo gaar ama ganacsi xool ay ka soo galaan.

**Qod. 9**

Waxaa ka reeban in la badbaadiyo xubnaha howl mushaar ay ku qaataan oo xatta aysan ku jirin badbaadinta shaqaalaha.

**Qod. 10**

Mas'uuliyadda daryeelka ilmaha iyo xaaska ama sayga waa laga ogaan karo wada noolashada joogtada ah.

**Qod. 11**

Waxaa loo baahan yahay in la cadeeyo in qoyska iska, ama caruurta la dhalay ama waalidka ama walaalaha aysan bil kasto aysan heleynin lacagta howlgabka ah ama dhan 150 So bil kasta haddii ay xaas iska qabo yihiin ama So 100 xubin kasta ee qoyskaasi ka tirsan.

**Qod. 12**

Da'da 18 jir ah ee xubnaha qoyska ku qoranfaqraddaha c), g) iyo h) wax is beddel ah ma jiri karto kadib markii laga reebo maerxaladda ku qoran faqradda d) ee Qod. 7.

**Qod. 13**

Qof shaqo ku curyaamay waxaa loola jeeda qof ay nusqaantay kartida in uu macaasho kadib markii qabkiisu si rasmi ay u yaraatay tiro 50% sida caadi ah.

Curyaanimaadasi waa in lagu caddeya qiraalk ka soo baxay Hey'adaada Qaranka ee Badbaadada Bulshada amd Hey'adda Qaranka ee Howlgabnimada Shaqada, haddii la waayo warqad takhrareed. Kaas oo ay Hey'adda Badbadada Buslhadu ay aqoonsatay.

## CINWAAKA 2AAD

### Cutubka 1aad

Howlahada Badbaadinta. Mugga, xeendabka iyo qaababka howlaha badbaadada cafimaadka iyo dhaqaalaha

**Qod. 14**

Howlaha badbaadinta ee Hey'adda waxay ka kooban yihin:

1) Taakuleynta caafimadka guud ee guriga loogu tegi doono iyo mid rugta caafimaadka;
2) Baarista caafimadka ee gaarka ah;
3) Daweeynta farmashiyaha;
4) Taakuleynta isbitaalka la jiifiyo;
5) Taakuleynta qeybta dhalmada;
6) Taakuleynta cudurada caruurta;
7) Taaluleynta guud ahaneed;
8) Bixinta gunnada cudurka ku timaada.

**Qod. 15**

Xuquuqda taakuleynta caafimaka - oo loogu tala xubnaha qoyska ka tirson, waxay la xiriirta shaqada uu qofka shaqaalaha uu weli haayo kadib markii laga reebo marxalada qodobada 40 iyo 41.

**Qod. 16**

Taakuleynta caafimad ku carifan faqradaha 1 ila 7 ee Qod. 14, waxaa loogu tala galay iyadoo aanan loo kala soocin qeybaha shaqaalaha ama xubnaha qoysaska ee hoos yimaado shaqaalaha.

**Qod. 17**

Xiririka taakuleynta wuxuu ka bilaaban doonaa maalinta lagu qoro, kaas oo sii toos ah uu siin doonon shaqaalaha iyo xubnaha qoyskiisa xuquqda in ay ka faa'ideystaan taakuleynta ku qoran Qod. 14 faqridiisa lamb 1 ilaa 8 qeybta kowaad iyo 1 ilaa 7 qeybta labaada.

**Qod. 18**

Taakuleynta ku tixan faqradaha 1 ilaa 6 ee Qod. 14 waxaa la joogteyn karaa ila 180 beri oo isku xig-xigo ee sanad kasta.

**Qod. 19**

Qeybta farmashiyaha wuxuu ka kooban doonata bixinta lacag la'aanta ah ee daawooyinka iyo hababka daweeynta ee kale oo ay ka mid yihin kuwa gaarka haddi

loo bahdo oo lagu beddeli Karin hababka caadi ah, kuwaasi oo ku qoran liiska u baahan in la helo aqbalidda Qeybta Baarista ee Caafimadka.

Si loo fuliyo ahmiyadda in ay fuliso waajibaadkeeda, waxaa loo bahan yahay in yeelato armaajo farmashiyo oo hoos tago maamulka hey'adda Badbaadinta isticmaalkeeda gudaha ah. Armaajada daawada waxaa lagu keydin doona daawooyinka sida ugu haboon qabkooda.

**Qod. 20**

In la jiifo bukaanka Isbitaalka ama rugaha caafimadka ee gaar loo leeyhay ee cudurada lagu daaweyn Karin guryahooda waa in sidaas ay u aqoonsato Guddiga teknikada ee Hey'adda.

**Qod. 21**

Taakuleynta dhinaca dhalmada waxaa loogu fidin doona mid guriga lagu dhaliyo haddi fooshu tahay mid caadi ah , isbitaalkana in la geeyo haddi ay dhiban tahay.

Laakin haddii taakuleynta dhalmada, kadib markii la codsado, xatta haddii ay dhalmadu caadi tahay ama dhicis noqoto, waxaa muhim ah in Guddiga Teknikado ay aqbasho faayo dhowrka iyo beeyada la tixgelio. Sidas awgeed H'eyaddu waxaa xambarsan doonta kharajka jiifka isbitaalka ilaa 8 beri ee qiimaha aadiaga ee logu tala galay dhalmada caadiga ah.

**Qod. 22**

Haddii bukaanku uu jirado muddo ka badan inta ku carifan Qod. 18, cudurkaasi oo bilowda sanad hore siina socda sanadkii ku xigay, maalmaha uu helay taakuleynta caafimad waxaa lagu xisaabin doona sanadwalba.

**Qod. 23**

Shaqaalaha ama xubnaha qoyska oo gaaray xadka u qoran ee taakuleynta ma heli karo taakuleyn dheerada xatta hadii uu helay qeyb ka mid taakuleyntii loogu tala galay.

**Qod. 24**

Oggolaanshaha adeegyada badbaadinta xubnaha qoyska waxay la mid tahay nidaamka, qaabka iyo xannibada loogu tala galay ciddii ugu horeynta lahayd xaqqa badbaadinta waxayn hos imaan doonta xuquuqda loo fidiyey qofka reerka madaxda u ah.

**Qod. 25**

Xubnaha qoyska waxay xaq u yeelan doonaan ilaa 30 beri oo isku xigxigta ee la jiifiyey Isbitaalka ama tiradas oo kale ee sanad walba.

Laguma sal goy'in karo isbitaal jiifkaasi haddii ay cudurada neerfaha ama dhimika ama cudurada joogtada noqdeen.

**Qod. 26**

Shaqaalaha muruq maalka ah oo uu cudur haleelo, wuxuu xaq u leeyahay gunno maalmeed sida uu carifayo Qod. 28;

a) Haddii mudada jiradu ay ka yartay 3 beri oo ku qasabtay shaqaalaha in uu shaqo tegin sida takhtarkiisu ku taliyey;
b) In shaqaaluhu uusan ku sugneeyn xalaadaha ku qoran qodobada 43,44 iyo 46.

**Qod. 27**

Gunno xaq uma yeelan karo shaqaalaha, inkasto uu xanuunsaday haddana ka helay lo-shaqeeyaha ama cid kale dhaqaale la siman am aka badan gunnada uu ku heli laha cudurka haleelay awgiis.

Haddii dhaqaalahasi ka yaryahay gunnada Hey'adda Badbaadada shaqaalaha aya bixin doonta gunno.

Amaraddan sare ku xusan laguma daqabi doono haddi dhaqaalaha shaqaaluhu helay muddada uu xanuunsanaa ay ka timid fal iska wax u qabso ee shaqaaluhu suubiyey.

**Qod. 28**

Si loo xisaabiyo gunnada uu xaq u yeshay ciddi loogu tala galay, waxaa la xisaabin doonaa mushaarka 4 cusbuuc ama bil kasto eek a horeeysay maalinta uu shaqaaluhu ka baaqday shaqada jirro daraadeed.

Kadib markii ay cadaato lacagta guud haan u soo gasho 4tii cusbuuc ama bil kasto waxaa lo qeybin doona si loo helo lacagta maalin kasto uu helo shaqaalaha kadib markii laga reebo canshuurta ku waajibta.

Waxaa markaas kadib 50% laga soo qaadi doona mushaar maalmeedka oo noqon doonta dhaqaalaha taakuleeynta

Haddii shaqaaluhu uusan shaqeynin muddo toos ah, dhaqaalaha taakuleynta waxaa lagu xisaabin doona mushaarka uu saacadii shaqeeyo muddadii ka horeysay intii uusan jirada haleelin.

Gunnada waa in loo xisaabiyaa mal maha Axadaha iyo malmaha fassaxa ah.

**Qod. 29**

Gunnada waxay ka bilaaban karta maalinta 4aad ee markii cudurka lagu arkay waxaana la siin doona ila 150 sanad kasta ee maaliyadeed.

Haddii cudurkuu uu sii socdo oo uu sanad maaliyeedka kale u gudbo waxaa sanad maaliyeed walba gooni ahaan loo xisaabin doona.

Markii la reebo inta sare lagu sheegay, shaqaalaha gunno joogta qaata ilaa iyo 2 sano maaliyey muddada aan ka badneyn 150 beri, kaas oo in si joogta cudurada ay kalifto gunnada la qaato muddada u dhexeysa laba gunnod oo aan laga kor marin ilaa 60 beri, xaq uma yeelan karo in gunno cusub loo furo haddii aysan ka soo wareegin ilaa 75 beri oo 15 ahayeen kuwa shaqo.

**Qod. 30**

Muddada sanadlaha ah 150 beri oo sare lagu soo xusay, waxaa laga dhimi doonaa ilaa 90 beri, gunnada lama siin doono muddo ka badan ilaa 3 sano oo isku xigxigta, haddi shaqaaluhu ay haleeshay cudur joogta ah oo uusan ka imaanin dhawac horay dagaal ku soo gaaray.

Takhaatirka isu tagey ayaa caddeyn karo curudadda joogtada ah.

Caddeynta in qofka shaqaaluhu qabo cudur joogta ah kama xannibi doonto xaqiisa in uu helo gunnada taakuleynta badbaadinta.

**Qod. 31**

Gunnada taakuleynta xaq uma laha qofka dumarka ah ee shaqalaha ah oo ilma dhasha, muddada dhan ee shaqada ay ka baaqato dhalmada awgeed, kadib markii laga reebo in ay qofkaasi ay cudur la xirira uurka iyo dhalmada uu ku dhacay. Waxaay

gunno xaq u yeelan doonta haddii cudur la xirira uurka ama nas nuujinta haleelo inta ka baxsan muddada sharci dhalmada u oggolaaday.

**Qod. 32**

Haddii uu cudurko ku soo noqdo muddo 30 beri ah laga bilaabo maalintii la siiyey shahaadada caafimaadka in uu ka restay cudurkaasi waxaa u xaq u yeelan doona gunnada taakuleynta.

**Qod. 33**

Gunnada waxaa la bixin doona cusbuuc kasta iyadoo xisaabtu lagu saleeyey cusbuuci la soo dhaafay.

**Qod. 34**

Haddii cudurka dartiis shaqaaluhu la jiifiyo isbitaal ama rug caafimaad waxaa laga jari doona gunnadiis shan meelood 2 meel intii uu qaadan lahaa ilaa iyo muddo ugu badnaan hal bil ah. Haddii shaqaalaha xanuunsan uu mas'uul ka yahay qoys waxaa gunnadisa laga dhimi doona ila 2 dhig 3diidab waxaa la siin doona ilaa iyo muddada uu jiran yahay. Labadaas marxaladood muddada ugu badan ee la siin karo gunnada jiirada waa 150 beri.

**Qod. 35**

Haddii ay dhacdo marxalad aad u culus ama ay dhacaan marxalado aan caadi ahayn,oo ku qasbo Qeybta Cudurada in ay xalin kari waayan shaqaalaha baahidooda iyo xuquuqdoa, waxaa Hey'addu iyadoo ka heleysa Maamulaha Guud gunno dhimis ku meel gaar ah ay ku suubin garta gunnada.

**Qod. 36**

Haddii qofka shaqaalahi ah ama xaaskiisa ay geeriyooto, waxaa loo ogool yahay in la bixiyo kharajka duugta oo dhan So 200.

**Cutubka 2aad**

Adeegyada dhameeystiran iyo taakuleynta badbaadinta

**Qod. 37**

Takuleeynta ku qoran faqradda 7 ee Qod. 14 waxaa ka mid ah:

a) Gelinta ilkaha;
b) Rakibaadda qeybaha jirka iyo indhaha oo lagu beddelo kuwa farsameysan;
c) Okiyaalaha;
d) Tacabulka kale oo daaweynta ah (sida suunta caloosha celiyo, midka jilbaha, sokosyada iwm).

**Qod. 38**

Waxaa ku xiran marxaladaan si loo helo adeegyadaas:

— Go'aan ka soo baxa Guddiga Farsamada ee Hey'adda oo ku saabsan baahida adeeygadasi oo la xiriira jiritanka dhibaatoyin jirka qofka la badbaadiyey;
— In la hormariyo baahida qofka shaqaalaha markii loo eego qoyskiisa;
— In misaaniyaddu ay oggoshay;
— In adeegaani uusan ka mid ahayn adeegyada guud ahaan ama gaar ahaan ee laga heli lahaa hey'addo kale ee taakuleyn.

**Qod. 39**

Adeeygayadaasi waxaa loo bixin doona sida soo socota:

a) Rakiibadda ilkaha ilaa So 10 midkiiba ilaa iyo So 200;
b) Okiaalaha halkii joogba So 15 oo wata muraayad caadi ah ah iyo So 20 muraayada gaarka ah (aragtida kuwa lagu saxo, aragtida fog iyo tan dhaw iwm);
c) Rakibadda qalabka u dhigma indho: 50% qiimaha horay loo aqbalay oo ku qoran liisaska shirkadaha ku takhasusay ilaa iyo So 90;
d) Rakiibada qalabka xubnaha maqan u dhigma: 50% ee kharajka loogu talaha oo ku qoran liisaska shirkadah ku takhasusay ilaa iyo So 25.

**Qod. 40**

Haddii shaqaalahu noqdo shaqo la'aan ama shaqada laga hakiyo markii uu cudurka ku dhacay, wuxuu weli yeelan doona xaq taakuleynta badbaadada, isaga iyo xubnaha qoyskiisa sida halkan ku carifan:

a) Gunno malmeed u dhigmatay 2/3 ee gunnada caadi ah, haddii cudurku uu ku biloowda laba bilood gudahooda markii laga joojiyey ama laga hakiyey shaqada. Gunnadisa lama siin karo haddii shaqaaluhu qadanayo gunno shaqa laa'aneed;
b) Taakuleyn isbitaal ee la xiriiro isla muddadasi;
c) Taakuleyn rug cafimaad (mid uu yimaado iyo mid guriga loogu tegi doono) iyo farmashiye ee cudurda bilowda 6 bilood gudahooda markii shaqada laga joojiyey ama laga hakieyyd. Haddii aya dhacdo in muddadas dhexdiisa uu shaqalaha xanuunsan uu geeriyodo, xubnaha qoyska waxay xaq u yeelan doonaan takuleyn dhinaca duugta.

**Qod. 41**

Shaqaalaha xafiiska, haddii shaqa la'aan ku dhacdo, wuxuu xaq u yeelan doona taakuleynta badbdada cudurada ku bilowday 2 bilood ka hor markii shaqada laga joojiyey.

**Qod. 42**

Haddii qof shaqaalaha ahi uu jiro ama shil awgeed ka helo cid seddaxaan takuleyn dhaqaale waa in uu celiyaa Hey'adda gunnoyinkii uu ka helay oo u dhigmata dhaqalaha uu ka helay cidda seddaxaad.

## CINWAAKA 3AAD

### Cutubka 1aad

Xadka iyo Joojinta Xaqqa Taakuleynta

Taakuleyn xaq u ma laha shaqaalaha si kas ah isu qaadsiiya cudur ama qofka dumarka ah ee shaqalaha oo ilmaha iska soo ridda sida sharciga ciqaabtu qabo.

Sidoo kale waxaa laga joojin doona wax allaliyo wixii taakuleyn ah qofka shaqaalaha ahi oo:

a) Dhereesta si qayaano leh muddada cudurka isagoo ka been abuuro, ama iska yeel yeela ama si qalad ah uga helo Hey'adda taakuleyn uusan xaq u leeheen;
b) Diido in dib u eegid Takhtarka kormeeraha ah uu ku suubiyo amase daawoyinka la siiyey diido in uu qaato;
c) Galo xabsi muddada cudurku haayo.

Marxaladda ku tilmaaman faqradda a) shaqaaluhu waa in uu dib ugu soo celiyeaa gunnoyinkii oo si xaq darro ah uu qaatay ama kharjaka ay Hey'addu u gasho dartiis.

**Qod. 44**

Waxaa la joojin kara xuquqda taakuleynta ilaa iyo muddo aan ka badneyn 6 bilood haddii shaqaaluhu laba mar laga joojiey asbaabaha ku qoran Qod. 43.

**Qod. 45**

Muddada laga joojiey taakuleynta badbaadinta waxaa weli laga doonaya shaqaalaha in laga shubo qidmada badbaadinta sida ku qoran xeerkaan
Amaradda lagu soo saro shaqaalaha waxaa lagu dabaqi doona xubnaha kale ee qoyskiisa sida ku cad Qod. 24.

**Qod. 46**

Shaqaalaha xaqiisa taakuleynta badbaadada cudurada weli way u taagan tahay:

a) Haddii cudurka uu iskiis ugu dhacay;
b) Haddii cudddurka ay sababeyn khamro ama alkolo;
c) Guriga iskaga baxo isagoo amar takhtarka haysanin;
d) Haddii shaqo galo isago marxalad jirro ku jira;
e) Haddii uu bilaabo howlo si dedejin karo xaladiisa caafimad.

**Qod. 47**

Shaqaalaha taakuleynta helo eek u xusan qod. 43 iyo 46 xaq uma yeelan doono in uu helo taakuleyn ilaa iyo 20 beri oo lagu xaqiijin karo asbaabaha dhaliyey marxaladiisa.

**Qod. 48**

Asbabaha kalifa in laga reebo, ama laga joojiyo ama laga hakiyo taakuleynta sida ku tilmaaman qodobada sare ku xusan waxaa u soo qori doono shaqaalaha Guddiyada Farsamada ee Hey'adda.

30 beri gudahooda ayaa loo ogol yahay in shaqaaluhu ka qaato racfaan go'ankaasi isagoo warqad rasmi ah u soo qori doono Guddiga La talinta ee Hey'adda.

Isla warqad rasmi ah ayaa loogu soo jawaabi doona aqbalida guud ahaaneed ama mid nusqaan ah rafcaanka shaqaalaha geystay.

**Cutubka 2aad**

Howlaha taakuleynta

**Qod. 49**

Kama mid ma ahan howlaha Maamulida Cuduradda ee Hey'adda si ay u helaan taakuleyn:

a) Shilaalka shaqada sida ku qoran sharciga khuseeya;
b) Cudurada qaaxada oo ka mid noqday howlaha taakuleynta sida ku qoran sharciga lamb 1827 ee 4 Oktoobar 1935 iyo is bedelladi ka dambeyey;
c) Cudurada kale ee hos yimaada qaababka kale ee taakuleyn ama ay mas'uliyadoodu leedahay hey'ada kale ee faaya dhowrka iyo caafimadka dadweynaha.

**CINWAANKA 4AAD**

Awoodda, Rafcaanka, Kormeerka iyo Adeegyada kala Bixintooda

**Qod. 50**

Taakuleynta caafimadku waa mid toos ah oo noqon karta in guriga ay shaqaalaha Hey'addu ugu geeyan ama qaab caafimaad oo si caadi ah loo isticmaalo.

Haddii ay taakuleyntu tahay mid degdeg ah waxaa lagama maarmaan ah in Hey'addu yeelato awood in ay xaaladasi u aqoonsato mid deg deg ah kadib markii laga baran dego.

**Qod. 51**

Go'aanka ku saabsan in shaqaaluhu ku jiro marxal cudur joogta ah waxaa iska leh Guddi Takhaatirta Hey'adda oo u shaqaaluhu horgeyn doono arjigiisa lagu soo diray qoraal rasmi ah inta u dhexeysa 30 beri ka bilaaba maalinta la ogeysiiyey in cudur joogta ah uu qabo.

Guddigas Takhaatirta ah wuxuu ka kooban yahay 3 takhaatiirk oo 2 ka mid ah ka socdaan Hey'adda iyo shaqaalaha xanuunsan, midka seddaxaad oo madax u noqon doono Guddiga waxaa magacaabi doono laba takhtar ee sare ku xusan amase Kormeeraha Caafimadka.

Waxaa bixin doono kharajka 2 takhtar Hey'adda Badbaadada, midka 3aad waxaa bixin doono shaqaalaha takhtaarkaas so xushay.

**Qod. 52**

Awooda baarista iyo kormeerka caafimadka waxaa iska leh Hey'adda  xatta haddi bukaanku jiifo rug caafimad.

Maamulaha isbitaalada ma didi karaan in ay qaabilaan shaqalaha ku jira badbaadada cuduradda , waxaana loo celi doona kharajkooda, Waxaana loo baahan yahay in loo ogolaado in bukaano ay baaran kormeerayaasha caafimad inta ay jiifaan isbitaalada.

Maamulada isbidaalada waa in ay siiyaan nuqullada qorallada caafimaadka iyo baarista la xirira ee shaqaalaha halkaas lagu xanaaneeyo.

**Qod. 54**

Qofka bukaanka ah wuxuu si toos u codsan kara muddo 10 beri gudahooda laga bilaabo malintii go'aanka laa gaaray in loo gudbiyo Guddiga Takhaatirta.

Guddiga Takhaatiirta wuxuu qaabsamidiisa noqon doonaa sida go'aaminta in uu qabo cudur joogta ah.

**Qod. 55**

Shaqaalaha ka faa'ideynsan doono taakuleynta badbaadada cudurada waa in uu hoggansanada amarada halkaan ku qoran iyo kuwa kale oo la xirira ee la soo saari doono.

**Qod. 56**

Haddii shaqaalaha taakuleynta badbaada uu ku helay arrimo qayaana ah ama kama'a ah ee cid seddaxaad ay geystay, taas oo dhibaateysa cudurka, wuxuu xaq u yeelanaya in Hey'addu la wareegto doodisa si loo dib u celis loo kharajka taakuleynta loo qondeeyey.

Markii Hey'addu ay xojineyso in ay soo ceshato kharajkeeda, shaqaaluhu ma lumen doono xuquuqdiisa takuleynta badbaadada.

**Qod. 57**

Waxaa hal sano ku eg, taakuleynta laga bilaabo maalintii ay taakuleyntu u bilaabatay ama markii jojinta rasmi ah la helay.

**CINWAANKA 5AAD**

Tabarrucaaad

**Qod. 58**

Tabaruca taakuleynta waxaay ku waajibtay sida ku cad Qod. 14 kala bar loo-shaqeeyaha, bar kalena shaqaalaha ayaa dhiibi doono:

1) 5% ee mushaarka canshuurta ka hor ahaneed ee shaqaalaha hoose iyo xubnaha qoyskooda;
2) 3% ee mushaarka caanshuurta ka hor ee shaqaalaha xafiisyada iyo xubnaha qoyskooda.

**Qod. 59**

Qeybta tabaruca waxaa loo-shaqeeyuhu ka reebi doona mushaarka shaqalaha markii mushaarkisa la siin doono.

**Qod. 60**

Loo-shaqeeyuhu wuxuu Hey'adda u soo shubi doono tabaruca qeybta asiga laga rabo iyo qeybta shaqaalaha 15 beri gudahooda ee bil walba.

Loo-shaqeyaha la soo daaha bixinta lacagta badbaadinta wuxu muteysan doona ganax ah korthinta boqolkiiba 2 ee canshuurta.

**Qod. 61**

Loo-shaqeeyuhu wuxuu mas'uul ka yahay wixii laga hilmaamay ama laga qalday macluumaka laga soo gudbiyey shaqaalaha badbaadada ku jira oo sababi karo dhibaato dheeraad ah.

**Qod. 62**

Shaqaalaha bukado wuxuu xaq uu yeelan doonaa in uu helo taakuleynta cafimaad xatta haddii oo loo-shaqeeyo uusan soo shubin tabarucii sida ku qoran qod. 60.

Loo-shaqeeyuhu wuxuu xaq u yeelan doona in dib loogu celiyo kadib markii uu muddo 30 beri gudahao u soo gudbiyo arjiga rasmiga ee kharaka tabaruc o uu la daahay.

**Qod. 63**

Waxaa la buriyey wixii sharci ah ee ka soo jeedu sharcigaan.

**Qod. 64**

Dekreetadana waxay hirgelieas 1 Jenaayo 1952.

Muqdisno, 28 disember 1951.

Maamulaha Guud

**Fornari**